**War** saxaafadeed

# Gobolkaaga, taarikadaada

15-ka Oktoobar, 2025  Su'aalaha Warbaahinta (Media inquiries)

## Markii ugu horraysay in ka badan 40 sano, Alberta waxay cusboonaysiinaysaa taarikada gawaarideeda iyadoo qaadatay halku dhigga "Strong and Free" (Xooggan oo Xor ah), waxaana naqshadda ugu dambaysa go'aamin doona dadka reer Alberta laftooda.

Laga bilaabo Oktoobar 15 ilaa Noofambar 5, dadka reer Alberta waxay ka qayb-qaadan karaan codbixin onlayn ah oo qaab tartan ah si ay u doortaan naqshadda cusub ee taarikada gobolka naqshad si sharaf leh u muujinaysa cidda aan nahay mar kasta oo aan waddooyinka saarno.

Taarikada cusub waxaa la heli doonaa dabayaaqada 2026, waxaana lagu dhisi doonaa mawduuca "Strong and Free", kaas oo ku celinaya halku-dhigga Laatiinka ah ee gobolka isla markaana muujinaya aqoonsiga geesinimada leh ee Alberta, xooggeeda dhaqaale iyo kibirkeeda qotada dheer ee gobolnimo. Halku dhigga oo lagu daray taarikada wuxuu sidoo kale tilmaamayaa heesta qaranka Kanada iyo doorka Alberta ee ah gobol xooggan oo madaxbannaan oo qayb ka ah Kanada mideysan.

"Laga bilaabo dhulalkayaga ballaadhan ilaa ruuxdayada ganacsi ee hal-abuurka leh, Alberta wax badan baa ay ku faani kartaa, taarikadeenna cusubna waxay ka tarjumi doontaa faankaas. Markii ugu horraysay afartan sano gudahood, dadka reer Alberta ayaa dooranaya sida aan sheekadeenna u sheegno. Waxaan rajeynayaa in aan arko naqshadda la doorto oo adduunka tusaysa in tani tahay dhulka kuwa xooggan oo xor ah."

***Danielle Smith, Gudoomiye Alberta***

Classification: Public

Iyadoo la dooranayo naqshado ay ku jiraan meelo caan ah oo ka tirsan Alberta sida Buuraha Three Sisters, iyo calaamado soo jireen ah oo matalaya warshadaha aasaasiga ah ee gobolka sida beeraha iyo tamarta, naqshad kasta oo la soo jeediyay waxay wadataa calaamado ka tarjumaya quruxda, taariikhda, iyo ruuxa Alberta.

Marxaladda hore ee codbixinta, dadka reer Alberta waxay dooran karaan midka ay ugu jecel yihiin siddeed naqshadood oo gaar ah oo isku dara muuqaalka dabiiciga ah iyo taariikhda gobolka. Kadib marxaladda hore, afar naqshadood ayaa u gudbi doona wareegga labaad ee codbixinta, halkaas oo laba naqshadood oo ugu sarreeya la dooran doono, waxaana ugu dambayn jiri doona wareegga ugu dambeeya ee lagu dooranayo naqshadda guuleysata. Naqshadda guuleysata ee taarikada cusub waxaa lagu dhawaaqi doonaa intii lagu guda jiray kalfadhiga dayrta ee golaha sharci dejinta.

"Alberta waa gobol xooggan oo xor ah, dadka reer Albertana waxay heli doonaan fursad ay ku doortaan taariko cusub oo matalaya ruuxaasi. Taarikada cusub waxay noqon doontaa naqshad cusub oo qurux badan oo qof kasta oo reer Alberta ah ku faani doono ha ahaado qof shaqo u socda, haro ku sii jeeda, ama safar ku maraya Waqooyiga Ameerika."

*Dale Nally, Wasiirka Adeegyada Alberta iyo Yareynta Xeerarka Adag*

Haddii qof reer Alberta ah uu doonayo inuu beddelo taarikadiisa hadda jirta si uu u helo taarikada cusub marka la sii daayo, wuxuu si iskood ah u bixin karaa lacag dhan $28. Si kale, dadka reer Alberta waxay heli karaan taarikada cusub marka ay cusboonaysiinayaan diiwaangelinta gaarigooda, iyagoo aan wax kharash dheeraad ah bixin.
Darawalladuna sidoo kale way sii wadan karaan isticmaalka taarikadii hore xitaa kadib marka taarikada cusub la bilaabo, haddii ay weli tahay mid xaalad wanaagsan ku jirta oo si cad loo akhriyi karo.

## Xog Kooban

- Taarikada hadda jirta ee Alberta waxaa la naqshadeeyay sannadkii 1984.

Classification: Public

- Sannadkii 2021, Alberta waxay bilowday isbeddel ah oo laga gudbayay taariko rinji leh una guurayay taariko milicsi leh (reflective) oo leh isla naqshaddii hore.
- Naqshadaha cusub oo dhami waxay adeegsadaan farsamo milicsi ah si loo hagaajiyo akhrinta iyo aragtida xilliyada iftiinka hooseeya, taasoo u fududeysa booliska iyo nidaamyada otomaatiga ah. Waxayna buuxinayaan heerarka caalamiga ah ee muuqaalka, akhris fududka, iyo ka hortagga been abuurka.

## Macluumaad Dheeraad ah

- Alberta.ca/PickAPlate
- Taarikada Gawaarida (Licence plates)
- Macluumaadka Gaadiidka (Motor vehicle information)
- Adeegyada onlaynka ee gaadiidka (Motor vehicles - eServices)

## Warbaahin kala duwan

- Daawo shirkii jaraa'idka (Watch the news conference)

## Su'aalaha Warbaahinta

**Kevin Lee**

587-785-4366
Xoghayaha Saxaafadda Ku Meelgaarka ah, Wasaaradda Adeegyada Alberta iyo Yareynta Xeerarka Adag